# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #32

*Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka*

WWW.HEALTHOREGON.ORG/FOODSAFETY

### OAR 333-150-0000, CUTUBKA 1-201.10 QEEXITAANKA GOOBTA CUNTADA KUMA JIRAAN:

Goobta cuntada ama ururka diyaariya ama iibiya cuntada aan khatarta keenaynin si islamarkaasba loo isticmaalo marka la joogo madalada la isugu yimaado waxaa laga reebay in ay qaataan shatiga haddii ay:

- Shaqaalaha cuntadu kuma taabanayaan cuntada aan daboolnayn, ee u diyaarsan in la cuno gacmahooda oo banaan waxayna isticmaalaan maacuunta ku haboon sida tiishka deli, qaadooyin, fargeetooyin, galoofisyo halmar la isticmaalayo, ama qalab qaybin

### SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Saddexda qodob ee lagama maarmaanka ah ee lagu faahfaahiyay Xeerka Cuntada FDA ee loogu tala galay yaraynta cudurada cuntada ka dhasha ee lagu gudbiyo marinada saxarada iyo afka waxaa kamid ah: ka reebidda/xanibidda shaqaalaha cuntada ee xanuunsan; gacma dhaqasho wanaagsan; iyo ayada oo aan gacmaha oo banaan lagu taabanayn cuntada u diyaarsan in la cuno. Mid kasta oo kamid ah qodobadaanu ma ahan mid ku filnaanaya marka gaarkiisa loo isticmaalo wuxuuna noqon karaa mid aan waxtar lahayn. Si kastaba ha ahaatee, marka dhammaan saddexda qodobba la isku daro si sax ahna looga faa'iidaysto, gudbinta jeermisyada lagu gudbiyo marinada saxarada iyo afka waa la xakamayn karaa. Oregon waxay shaqaalaha cuntada ka doonaysaa in ay yareeyaan ku taabashada gacmahooda oo banaan cuntada, laakiin mamnuuc ma ahan wakhti xaadirkaan. Laakiin waa muhiim in la ogaado in gacma dhaqashada wanaagsan ee la isticmaalayo saabuun iyo biyo nadiif ah, aysan ku filnaanayn kaligeed wax ka qabashada si looga hortago gudbinta jeermisyada ilma-aragtada ah ee lagu gudbinayo si toos ah ugu taabashada gacanta cuntada in la cuno u diyaarsan.

## Mamnuucidda Ku Taabashada Gacmaha Banaan ee Munaasabada La Isugu Yimaad ee Kumeelgaarka ah ee Howlaha Laga Reebay

Isbadal cusub oo sharci ayaa ogolaanaya in cuntada qaar laga reebo shati qaadashada illaa inta aysan jirin ku taabashada gacmaha oo banaan cuntada in la cuno u diyaarsan. Cuntada waxaa loo tixgalinayaa in ay u diyaarsan tahay in la cuno marka aysan jirin karin ama dib u kululayn u hartay kahor inta aan la qaybin. Shaqaalaha cuntadu waxay faafin karaan xanuunka marka ay gacmahoodu taabtaan cuntada in la cuno u diyaarsan, sidaa darteed maacuun, difaaceyaal ama galoofisyo ayaa loo baahna yahay.

**Shatiga shardi loogama dhigayo adeegga cuntada marka la joogo munaasabadaha la isugu yimaad ee kumeelgaarka ah haddii kaliya cuntada aan khatarta keenayn la qaybinayo.**

Tusaalooyinka cuntada aan khatarta keenayn waa soda baraf leh, tufaaxa caramel iyo buskuddada gacanta lagu sameeyo.

Shaqaalaha cuntadu waa in ay isticmaalaan maacuun marka ay la macaamilayaan cuntooyinka u diyaarsan in la cuno, halkii ay isticmaali lahaayeen gacmahooda oo banaan.

Maacuunta ku haboon waxaa kamid ah:

- Tiishka deli
- Fargeetooyinka
- Fargeetooyinka iyo qalabka kale ee cuntadalagu guro
- Qaadooyinka
- Galoofisyada halka mar la isticmaalo ee aan latex-ka ahayn

**Galoofisyada iyo waxyaabaha difaaca ah badal uma noqonayaan gacma dhaqashada.**

Haddii aad doorato in aad isticmaasho galoofisyada halkamar la isticmaalo, markasta gacmaha dhaqo kahor inta aadan xiran galoofisyada iyo marka aad ku badalayso kuwo cusub.



***Waxaa jira qaabab badan oo la iskaga ilaalin karo taabashada cuntada marka laga***

Waa in aad galoofisyada badashaa:

- Isla markaaba marka ay ciidoobaan ama dilaacaan
- Kahor inta aadan shaqo kale bilaabin
- Kaddib marka aad la macaamisho cuntada in la cuno u diyaarsan

Marna ha dhaqin oo dib ha u isticmaalin galoofisyada halka mar la isticmaalo.



Oregon Health Authority